**Sharci lamba. 12 ee 15 Febraayo 1961**

**Aftida ansixinta Dastuurka Jamhuriyadda Soomaaliya**

**MADAXWEYNAHA KU-MEELGAARKA EE JAMHUURIYADDA**

**Markuu Arkay oggolaansha Golaha Shacabka**

**WUXUU SAXIIXAYAA**

Sharciga soo socda:

## CINWAANKA 1AAD

Axkaamta Guud

### Qod. 1
### Ujeeddada Aftida

Ayada oo laga adeegsanayo aftida lagu jideeyey sharcigan, muwaadan kasta, ayada oo la dabbaqayo axkaamta kala-guurka ee III iyo IV ee Dastuurka Jamhuuriyadda Soomaaliya oo sida ku meel gaarka u dhaqangalay 1da Luulyo 1960, wuxuu codkiisa ku cabbirayaa ogggolaansha ama diiddada dastuurkan isaga ah.

### Qod. 2
### Xaqa codbixinta iyo Isticmaalkiisa

Mawaadin kasta oo buuxiya shuruudaha Sharcigan wuxuu leeyahay hal cod: codka waa mid ah shakhsi, siman, xor, toos iyo sir.

### Qod. 3
### Dalka oo loo Qaybiyo Goobo Codbixin sí loo Abaabulo Codbixinta

Abaabulka codbixinta waxaa la sameynayaa, ayada oo lagu saleynayo degmooyinka jira.

### Qod. 4
### Xubnaha Aftida

Xubnaha aftidu waa:

- Goobaha codbixinta;
- Xafiisha degmada ee aftida;
- Xafiiska dhexe ee aftida.

Xafiiska Degmada, ee aftida, waxa uu xarun ku leeyahay magaala-madaxda degmo kasta. Xafiiska Dhexe ee aftida waxa uu ku yaal Muqdisho.

### Qod. 5
### Taariikhda Aftidu la Qabanayo iyo inta Ololuhu Soconayo

Hawlgallada codbixinta, ee la xiriira aftida, waxaa la fulinayaa hal maalin ee uu Madaxweynaha Jamhuuriyaddu ku cayimo Xeer lagu shaacin doono Faafinta Rasmiga ee Jamhuuriyadda, ugu yaraan lixdan maalmood ka hor.

Ololoyaasha iyo kulamada dacaayadda, ee lagu qabanayo meelo dadweynaha u furan, waxay bilaabanayaa 30 maalmood ka hor taariikhda codbixinta, waxayna dhammaanayaan maalin ka hor taariikhdass la iclaamiyey. Waxaa mamnuuca ah bannaanbaxyo saf ku-marid ah.

## CINWAANKA 2AAD
Kaqaybgalayaasha Aftida

### Qod. 6
### Dadka Xaqa u leh Codeynta

Waxaa xaq u leh in ay codeeyaan muwaadiniinta isugu jira labada jinsiba oo:

- sannadka 1961 buuxiyey ugu yaraan dáda 18 sano;
- aan caddeeyen in ay waalan yihiin ama sí kasta ayna uga muuqan calaamooyin waalli;
- aan ku sugneyn xaala xag, xukun ciqaab ah oo lagu riday awgiis.

### Qod. 7
### Aqoonsiga Dadka Xaqa u leh Codeynta

Aqoonsiga dadka, codeynta xaqa u leh, waxaa lagu sameeynayaa goobta codbixinta, ayada oo loo marayo hab-raac kooban, sida ku cad qodobka 27.

## CINWAANKA 3AAD
Goobaha Codbixinta iyo Xafiisyada Degmooyinka iyo Dhexe ee Aftida

### Qodobka 8
### Goobaha Codbixinta Aftida: Tirada iyo halka ay ku Yaallaan

Ugu dambeyn maalinta 30aad ee ka dambeysa taariikhda aftida, Wasiirka Arrimaha Gudaha, marka uu arko soojeedinta Guddoomiye kastoo gobol, dhegeystayna Guddoomoyaha degmada, waxa uu cayimayaa tirada goobaha codbixinta ee degmo kasta iyo halka ay ku kala yaallaan, baaxadda dhulkeeda iyo qiyaasta dadka deggen.

Soojeedimaha kor ku xusan waa in Wasaaradda loo gudbiyaa ugu dambeyn Maalinta soddonaad ee ka horreysa taariikhda aftida, laguna tilmaamo tirada codbixiyayaasha la filayo ee goob kasta oo codbixin.

### Qod. 9
### Dhismaha Xafiiska Goobta Codbixinta

Xafiisyada goobaha codbixinta waxa ay ka kooban yihiin guddoomiyaha, hal kaaliye iyo hal xoghaye: kaaliyuhu waxa uu qabanayaa waajibaadka guddoomiye ku-xigeen leeyahay.

Guddoomiyaha iyo kaaliyaha waxaa laga dhex dooranayaa dadka codeynta xaqa u leh. Xoghayaha waxaa laga dhex dooran karaa xataa dad aan Soomaali ahayn. Ayagaas waxaa magacaabaya guddoomiyaha degmada.

Beddelka u-qaybsanaha iyo xoghayaha, ee lagama maarmaanka noqota inta lagu gudajiro codbixinta, waxaa sameynaya guddoomiyaha oo ayagaas ka dhex dooranaya dad buuxiya shuruudaha looga baahan yahay.

**Qod. 10**
**Dhismaha Xafiisyada Degmo, ee Aftida**

Xafiiska degmo, ee aftida, waxa uu ka kooban yahay guddoomiyaha, saddex kaaliye iyo xoghayaha. Kaaliyaha ugu dáda weyn ayaa qabanaya waajibaadka guddoomiye ku-xigeen leeyahay.

Xafiis kasta waxaa loo qoondeeyey saddex u-qaybsane xagga kala xisaabinta tirooyinka. Guddoomiyaha iyo u-qaybsanayaasha waxaa laga dhex doorayaa dadka xaqa u leh codeynta, xoghayaha iyo u-qaybsanayaasha tirinta waxaa laga dhex dooran karaa xataa dad aan ahayn muwaadiniin Soomaali: ayagaas waxaa magacaabaya Guddoomiyaha Gobolka, oo tixgeliyey soojeediyey guddoomiyaha degmada.

Wixii beddel ah, oo lagama maarmaan noqdo ayada oo ay jiraan xaalado aan Guddoomiyaha gobolka u saamaxaynin in uu degdeg u soo farageliyo, waxaa sameynaya guddoomiyaha degmada.

**Qod. 11**
**Dhismaha Xafiiska Dhexe ee Aftida**

Xafiiska dhexe ee aftida waxaa uu ka kooban yahay guddoomiyaha, guddoomiye -ku-xigeenka, saddex kaaliye iyo xoghayaha.
Xafiiska waxaa loo qoondeeyey afar u-qaybsane xagga xissabinta tirooyinka.

Guddoomiyaha waxaa ah Garsooraha Maxkamadda Racfaanka, ku-xigeen guddoomiye waxaa ah Garsooraha maxkamadda gobolka Benaadir.

Kaaliyaasha waxaa laga dhex dooranayaa dadka xaqa u leh codeynta, xoghayaga iyo u-qaybsanayaasha xagga tirinta waxaa laga dhex dooran karaa xataa dad aan muwaadiniin Soomali ahayn. Ayagaas waxaa magacaabaya Wasiirka Arrimada Gudaha.

**Qod. 12**
**Wakiillada Axsaabta Siyaasiga**

Agaasimada Dhexe ee Xisbiyada siyaasiga, oo sida sharciga waafaqsan loo dhisay soddon maalmood ka hor taariikhda codbixinta ( la qabanayo) ama qaybahooda maxalliga ah oo ayagaas wakaalad ka haysta, waxay khayaar u leeyihiin in ay, goob kastoo codbixin iyo Xafiis degmo, iyo Xafiiska dhexe ee Aftida, u soo magacaawdaan wakiil u gaara oo laga soo dhex doortay dadka codeynta xaqa u leh iyo hal beddel-u-yaal ah oo lagu beddelo wakiilka rasmiga haddii uu maqnaado.

Wakiilka waxa uu xaq u leeyahay inuu goobjoog u noqdo dhammaan hawlgallada goobta codbixinta iyo xafiiska loo qaybiyey qoondeeyey iyo inuu maxdarka ku qoro wixii caddeymo ah.

Qoraalka magacaabista waa in, ugu dambeyn toban maalmood ka hor taariikhda aftida loo madlay, loo geeyaa guddoomiyaha degmada, kaas oo wakiil kasta ruqsad qoraal ah u siinaya in geli karo goobta codbixinta ama xafiiska ku xusan ruqsadda qudheeda.

**Qod. 13**
**Wargelinta Xilalka iyo Dhaarta**

Xubnaha guddiga goobta codbixinta iyo xafiiska aftida midkoodna lagama dhaafi karo waajibaadka ku xusan cinwaankan, haddii aysan jirin sababo la caddeeyey oo aan laga fursan karin. Ka/dhaafidda waxaa awood u leh oo bixinaysa madaxda sameysay magacaabista.

Magacaabista waa in la sameeyo laguna wargeliyo dadka ay khuseyso, ugu yaraan 15 maalmood ka hor taariikhda aftida.

Xubin kasta oo ka tirsan guddiga goobta codbixinta ama xafiiska degmo ama dhexe ee aftida, ka hor inta aysan qaban/la wareejin xilka, waa in ay qaalliga ama garsooraha maxkamadda degmada hortiisa ku marto dhaarta maamuus ee soo socota:

"waxaan ku dhaaranayaa magaca ILAAHAY (swt) in xilka la igu aamina, ee la xiriira aftida dastuurka, aan ku guto damiir nadiif ah, daacadnimo iyo aniga oo sí aan leexleexad lahayn u xurmeynayo Sharciga".

Garsooraha racfaanka iyo garsooraha gobolka Benaadir waxay dhaarta ku marayaan guddoomiyaha Maxkamadda Sare hortiisa.

## Qod. 14
## Sifaha Sarkaal guud oo ay Yeelanayaan Xubnaha Guddiga Goobta Codbixinta ama Xafiisyada Aftida

Dhammaan xubnaha ka kooban yihiin goobta codbixinta iyo Xafiisyada aftida iyo weliba Wakiillada xisbiyada ee u idman in ay galaan goobta codbixinta iyo Xafiisyada kor ku xusan, waxaa loo ciqaadayaa, xag kasta oo saameyn sharci ah, inta ay ku gudajiraan gudashada xilalkooda, in ay yihii saraakiil guud,

Ma qaban karaan xilalkaas kor ku xusan ciidamada militariga, kuwa la ciidameeyey, madaxda maamullada degmooyinka iyo hawlwadeennada xisbiyada siyaasiga iyo qaybahooda.

## Qod. 15
## Sallaxaadda Goobaha Codbixinta iyo Xafiisyada iyo Xafiisyada Degmo iyo Dhexe, ee Aftida

Sallaxaadda goobaha codbixinta iyo Xafiisyada degmo ee aftida waxaa xaqiijinaya guddoomiyaha degmada iyo maamulayaasha degmo, ee idman, kuwaas oo, degaannada dawladaha hoose gudahooda, kaashan kara hawlqabadka maamullada dawladaha hoose: sallaxaadda Xafiiska dhexe, ee aftida, waxaa sameynaya Wasiirka arrimaha Gudaha.

## Qod. 16
## Waraaqaha Tilmaamaya Goobaha Cobixinta iyo Xafiiska Degmo ee Aftida

Ugu dambeyn maalinta labaatanaad ee ka horreysa taariikhda aftida, Guddoomiyaha degmada waxa uu dadweynaha ku wargelinayaa tirada iyo shaacita goobaha codbixinta iyo weliba halka uu ku yaal Xafiiska aftida, asaga oo adeegsana waraaq lagu dhejiyo looxaanta degmada ee maamulayaasha idman ee degmo iyo maamullada dawladaha hoose iyo meelaha kale ee dadweynaha u furan, ayada oo loogu darayo ogeysiis kale oo loo adeegsado no dadodiyayaal ah.

**Qod. 17**
**Gunnooyinka Xubnaha Goobaha Codbixinta iyo Xafiisyada degmo iyo Xafiiska dhexe ee Aftida**

Xubnaha goobta codbixinta iyo xafiisyada degmo iyo xafiiska dhexe ee aftida waxay leeyihiin gunnoyinka soo socda:

— Guddoomiyayaal ….. …… ……. ……… ………. ……….. Sh. So. 40
— Ku-xigeen guddoomiye ……… ……… ………. ………. " " 35
— Kaaliyaal, xoghayayaal, iyo u-qaybsanayaal xagga tirinta ….. ……….. " " 30

Gunnada waxaa lagu muteysanayaa maalin kasta oo laga qaybgalo hawlgallada goobaha codbixinta iyo xafiisyada kor ku xusan: shaqaalaha dawladda iyo hay'adaha kale, ee dawladda, gunnadaas waxaa laga dhimiyaa bar.
Maalin kasta oo ay lagama huraan tahay in joogto ah loogu sugnaado meel ka baxsan rugta caadiga, ee degaan, dadka kor ku xusan waxa sahay safar ahaan u yeelanayaa:

— guddoomiyaha …………… …………….. ………… Sh. So. 20
— kaaliyayaasha, xghayayaasha, iyo u-qaybsanayaasha xisaabinta tirooyinka " " 15

**CINWAANKA 4AAD**
Agabka Codbixinta

**Qod. 18**
**Agabka Goobta Codbixinta iyo Xafiisyada Aftidaa**

Wasaaradda Arimaha Gudaha waxay Xafiis kasta oo codbixin, u diyarineysaa agabka soo socda:

1. Nuqul ka mid ah Dastuurka;
2. Nuqul ka mid ah Sharcigaan;
3. baakad moor ku afxiran yahay oo ay ku jirto shaambadda goobta codbixinta oo ay raacsan tahay qasac qad leh;
4. baakad moor saran yahay oo ay ku jiraan waraaqaha cod-bixinta;
5. Sanduuqa cod-bixinta;
6. baakad loogu talo galay kaararka codbixinta;
7. saddex daabacaado ee maxdar oo loogu talagalay howlgalka goobta codbixinta;
8. Dhalo yar oo ay ku jiro khad aan tirtirmeyn;
9. Shan warqadood oo ay ku qoran yihiin habraacyada oo ay tahay in codbixiyayaashu ay dhowraan marka ay cabbirayaan codka taagyeeraya ama ka dhanka ah dastuurka oo ku qoran afafka talyaaniga, carabiga iyo ingiriiska;
10. In ku filan oo ah qalabka wax lagu qoro;

Wasaaraddu waxay kaloo diyaarineysaa baakadaha lingaxan oo ay ku dhex jiraan shaabadda oo ay la socdaan khad iyo qasac lagu dhul shubo, jedwallada tirinta, maxdarrada, agabka iyo waraaqaha kale, ee daabacan, oo looga baahan yahay xafiisyada degmo iyo kan dhexe ee aftida.

Agabka goob kasta oo codbixin iyo xafiis kasta waa in lagu aruuriyaa sanduuqyo loogu talagalay oo ay Wasaaraddu, waqti ku habboon, u direyso, ayaga oo xiran isla markaana lingaxan, oo ay la socdaan sanduuqyada codbixita, Gudoomiyaasha degmo, marka laga reebo alaabada loo qoondeeyey xafiiska dhexe, oo ay sí toos ah ugu wareejineyso.

Wasaaraddu waxa ay isku mar u hawlgeleysaa diridda iyo ku/wareejinta guddoomiyayaasha degmo, ayaga oo ku ridayo baakad lingax afka ka saaran yahay, tiro kaarar keyd ah oo ku filan, oo ku socda goobaha codbixinta, haddii waraaqaha codbixinta ee la helay ay tiro ahaan ka yaryihiin baahida. Guddoomiyayaasha degmo ayaa, maalinta codeynta, waraaqahaas codbixinta ku bixinaya codsi qoraal ah oo sababeysan oo uga yimaada guddoomiyaha goobta codbixinta, codsigaas oo ay saaran tahay shaabadda goobta codbixinta.

Haddii dhibaatooyinka gaar ah, ee xagga isgaarsiinta, ay lagamamaarmaan ka dhigaan, idinka Guddoomiyaha gobolka dabadi, Guddoomiyaha Degmadu wuxuu u xilsaari karaa hal ama ka badan, oo ka mid ah aamulayaasha degmo, ee idman. Baakado kaloo xiran, lingaxna saran yahay,oo lagu wareejin doono ayagaas, ugu horreyn maalinta ka horreysa taariikhda codbixita, qayb ka mid ah kaarar keyd ah, oo loo haynayo Guddoomiyayaasha goobaha codbixinta ee ku yaal meelaha ka fog magaalo madaxda Degmada.

**Qod. 19**
**Shaabbado, Maxdarro, Waraaqo Codbixin, Saduuqyo Codbixin iyo Jadwallo Codtirin**

Shaabbadaha goobaha codbixinta ee aftida, waraaqaha codbixinta, maxdarrada, sanduuqyada codbixinta iyo jadwallada codtirinta waa kuwo nooc kaliya ah, oo laga isticmaalayo dhammaan Dalka Jamhuuriyadda.

Shaabbada waxa ay leeyihiin lambarin isku mida oo tixane ah (ama isdabayaal).

**Qod. 20**
**Kaarar waraaqo Codbixin**

Kaararka codbixintu waa warqado cad-cad oo adag, oo laga jari karo xirmo-buugeed istensil ah oo waraaqaha uu ka kooban warqadahaas oo laba-laba isugu mataansan oo mid kasta ay ku jiraan 100 kaar. Xirmo-buugeedyadu waxa ay goob waliba ee codbixin u leeyihiin lambarro isdayaal oo u gaar ah.

**Qod. 21**
**Qoqobyo iyo Sanaadiiq Codbixin**

Goob kasta oo codbixin kasta waa in, gudaheeda, lagu habeeyo 2 qoqob oo yaryar (qol) oo loogu talagalay in codka lagu dhiibto, ee uu guddoomiyaha degmada amro, sí loo xaqiijiyo sirnimada codka.

Qoqob (qol) kasta waa in la dhigo laba sanduuq codbixino oo midu caddaan yahay oo loogu talagay in ay ku dhacaan kaararka ay ku ridaan codeeyeyaasha oggolaaday dastuurka, kan kalana leeyahay midib madow oo loogu talagalay in ay ku dhacaan kaararka ay ku ridaan codeeyeyaasha diiday dastuurka. Midibka sanaadiiqda codbixinta waa in ahaado mid aan tirtirmeyn. Sanduuqa midibka cad waa in lagu dul qoro oraahda **"WAA OGGOLAHAY DASTUURKA",** ayada oo la adeegsanayo afafka:talyaaniga, carabiga iyo ingiriiska, sanduuqa midibka madow waa in lagu dul qoro, isla afafkaas, oraahda **"MA OGGOLI DASTUURKA".**

**Qod. 22**
**Warqado Xambaarsan Farriimo ku Wajahan Dadweynaha**

Hal nuqul ka mida warqad ay ku qoran yihiin farriimaha ku xusan lamba. 9, ee qodobka 18aad, waa in loo bandhigo sí dadweynaha uu sí fiican uga arki kara gudaha iyo dibedda goobta

codbixinta iyo weliba, si uu sí fiican ugu arki karo qofka codeynaya, gudaha iyo dibedda qoqobka.

## CINWAANKA 5AAD
Codbixinta

### Qod. 23
### Ku Wareejinta Aqabka Goobaha Codbixinta iyo Xafiisyada Aftida

Guddoomiyaha Degmada waxa uu amrayaa in, saacadda markay tahay lixda subaxnimo ee maalinta loo gooyey aftida, lagu wareejiyo goob kastoo codbixin, isla aruntaas codbixin, saxaaradda iyo sanduuqa codbixinta ee loo qoodeeyey.

Guddoomiyaha Degmada waxaa kale oo uu amrayaa wareejinta, saacadda markay tahay 16ka ee isla maalintaas, saxaaradaha loo qoondeeyey Xafiisyada degmada ee aftida.
Ugu dambeyntii waxa uu amrayaa in goob kasta oo codbixin iyo Xafiis degmo ee aftida, lagu wareejiyo:

— nuqul ka mida goáanka magacaabista xubnaha goobta codbixinta ama Xafiiska;
— nuqul ka mida ruqsadaha la siiyey wakiillada xisbi.

### Qod. 24
### Dhismada Xubnaha Guddiga Goobta Codbixinta

Guddoomiyaha goobta codbixinta, markuu helo agabka ku xusan qodobka la soo dhaafay:

1) waxa uu ku dhaqaaqayaa dumidda xubnaha goobta codbixinta, asaga oo hubiyayaasha iyo xoghayaha ugu yeerayo in ay ka mid noqdaan;
2) waxa uu wakiillada xisbiyada ugu yeerayaa in ay goobjoog ka noqdaan hawlgallada.
3) Kaddib markuu hubiyo, kana hubiyo xubnaha kale ee goobta codbixinta iyo wakiillada xisbiyada, bedqabka iyo dhammida lingaxyada saaran, waxa uu furayaa saxaaradda waxa uuna kontroolayaa agabka ku jira halkaas;
4) kaddib markuu hubsado inta kalana tusiyo dhammida lingaxyada la saaray
waxa uu furayaa baakada ay ku jirto shaabadda xafiiska iyo tan ay ku jiraan waraaqaha codbixinta, waxa uu saarayo shaabadda goobta codbixinta iyo tan ay ku jiraan waraaqaha (kaararka) codbixinta kuna ridayo saxaarad loogu talagalay;
5) waxa uu hubinayaa inta kala tusayaa in sanduuqyada codbixinta ay maran yihiin, wuxuuna ku dhaqaaqayaa in uu wada saaro lingaxo, asaga oo dhaafaya daloolka lagu ridayo warqadaha codbixinta oo kaliya, marka codbixinta, wuxuuna sanduuqyada codbixinta dhig-dhigayaa qoqobya (qolalalka yaryar);
6) Waxaa uu soo bandhigayaa, sí dadka oo dhan u arki karaa, nuqul ka mid ah dastuurka Jamhuuriyadda iyo weliba, ayada oo la raacaayo sida uu dhigayo qodobka 22, warqaadda ay ku qoran yihiin farriimada ku wajahan codbixiyayaasha;
7) Waxa uu agabka soo haray u gudbinayaa xoghayaha;
8) wuxuu xaqiijinayaa in la diro dhammaan agabka loogu baahan yahay codbixinta, sí hawgallada la xiriira ay ugu qabsoomaan nidaam.

Dhammaan hawlgallada waa in lagu dhammeystiraa waqtiga ugu yar, ee suurtagalka ah, ka dib, Guddoomiyuhu waxa uu ku dhawaaqayaa in ay codbixinta furan tahay.

**Qod. 25**
**Awoodaha Boliis ee Guddoomiyaha**

Guddoomiyaha goobta codbixinta waxa uu u xilsaaran yahay nabadgelyada kulanka, waxa uu ciidanka nabadgelyada u adeegsan karaa in goobta codbixinta ka saaro ama uu xiro kuwa carqaladeynaya habsami u socodka hawlgallada aftida ama galaya dembiyo.
Ciidanka nabadgelyada ma geli karaa goobta codbixinta, ayaga oo aan idin ka haysan Guddoomiyaha.

Madaxda rayidka ah iyo taliyayaasha ciidanka nabadgelyada waa in ay amarrada guddoomiyaha, sí loo xaqiijiyo xataa gelitaanka xorta ah ee goobta codbixinta ee codbixiyayaasha iyo in la horistaago isu imaatin cudur-daar l ah ee ka dhaca agagaarka.
Awoodo kuwaas la mida waxaa adeegsanaya, inta ku dabaqmi karta, Guddoomiyayaasha xafiisyada aftida.

**Qod. 26**
**Gelitaanka Goobta Codbixinta**

Xubnaha ka tirsan goobta codbixinta iyo wakiillada xisbiyada ka sokow, waxaa goobta codbixinta geli kara oo kaliya kuwa xaqa u leh inay codbixiyaan.

Codbixiyayaashu ma sidan karaan hub iyo qalab wax dhima; waa in ay goobta codbixinta u soo galaan mid mid; waxaana loo oggol yahay in ay u-codbixiyaan sida ay u soo kala horreeyeen. Laakiin waxaa hormarin mudan qof kasta oo u xilsaaran fulinta hawlgallada aftida.

**Qod. 27**
**Oggolaanshaha Codeynta**

Codbixiye kasta waxa uu codeyn karaa ka dib markuu:

1) caddeeeyo tilmaamihiisa (magaciisa oo saddexan) iyo dádiisa;
2) aqoonsiga sifaha xaq u-lehe codbixin ka helo masuuliinta goobta codbixinta, kuwaas oo degdeg goáan ku gaaraya habraac kooban ee ku saleysan warqado aqoonsi, markhaati, iyo wax kasta oo kale oo caddeyn noqon ah.

Gacanta bidix dusheeda ama haddii ay ka maqan tahay, gacanta midig dusheeda ama haddii labaduba ka maqan yihiin, meel ka mid ah jirka codbixiyaha, ee la arki karo, ayaa waxaa la saarayaa calaamad muuqata oo lagu sameeyey khad aan goáynin (tirtirmeynin).

**Qod. 28**
**Codbixinyeyaal xaqa u leh cod oo Shakhsiyan loodiiday Codeynta**

Codka waxaa bixinaya qofka xaqa u leh, asaga oo shakhsiyan xaadiraya (tegaya) Goobta codbixinta.

Qofka cillad xagga jirka, ee muuqata awgeed, ku sugan xaalad aysan suurtogal ahayn in uu kaligii bixiyo codka, taasna looga aqoonsaday goobta, guddoomiyaha ayaa u oggolaanaya in uu codeeyo asaga oo ay caawineyso qof kale ee uu ku kalsoon yahay.
Xoghayaha ayaa maxadarka ku qoraya sababta gaarka ah, oo darteed, codbixiyaha loogu oggolaaday in la caawiyo iyo weliba magaca codbixiyaha loo oggolaaday in la caawiyo iyo magaca qofka caawiyey.

Caddeynta Dhaqtarka looma baahna, haddii la soo bandhigo, laguna lifaaqo maxdarka.

**Qod. 29**
**Habka Codbixinta**

Marka la dhammeeyo hawlgallada ku xusan qodobka 27, guddoomiyuhu waxaa uu codbixiye kasta, mar, gacanta ka gelinayaa ( u dhiibayaa) waraaqda codbixinta, oo horey loo saaray shaabadda goobta codbixinta, taas oo laga jaray buugga rasiiddada oo leh lambarro isugu xigxiga qaabka taxanaha ee la xiriira buugga ay ka midka yihiin.

Haddaba codeeyuhu waa in uu tagaa qoqobka (qolka) loogu talagalay in ay ka dhacdo codeynta: codka taageerada dastuurka codeeyuhu waxa uu ku cabbirayaa, asaga oo warqadda (kaarka) codbixinta ku ridaya sanduuqa cad, codka ka dhanka ah dastuurka waxa uu codeeyuhu ku cabbirayaa, asaga oo warqadda codbixinta ku ridaya sanduuqa madow.
Isla marka uu sameeyo codeynta, codbixiyuhu waa iska tegayaa goobta.

Haddii codbixiyuhu arko in warqadda codbixinta baabásan tahay ama ayasan dhammeyn waxa uu guddoomiyaha weydiisan karaa mid labaad, asaga oo celinaya tii hore.
Guddoomiyuhu waxa uu amri karaa in codbixiyayaasha, cudurdaar la'áan ku daaha codeynta laga fogeeyo goobta codbixinta, kaddib marka laga soo celiyo warqadda codbixinta, ayada oo codeynta loo oggolaanayo kaliya, kaddib markii ay wada codeeyaan codbixiyayaala xaadirka ah.
Guddoomiyuhu, haddii uu ogaado in codbixiyuhu uu haysto dhowr warqado codbixin ama ah nooc ka duwan kuwa la jideeyey ama uu yahay mid horey u codeeyey, waxa uu qabanayaa ama gacanta ku dhigayaa warqadaha uu codbixiyo hayo waxa uuna degdeg ugu dhiibayaa ciidanka nabadgelyada, sí loogu gudbiyo hayadda garsoorka iyo in lagu oogo dacwad ciqaab ah.
Haddii ay dhacaan xaaladaha ku xusan saddexda faqradood, ee hore, xaaladahaas, tilmaamaha iyo magacyada codbixiyeyaasha ay khuseeyaan oo buuxa, waxaa lagu xusuus-qorayaa maxdarka goobta:warqadaha, laga qaaday codbiyeyaashaas, waxaa lagu suntayaa saxiixa Guddoomiyaha goobta iyo weliba kuwa ugu yaraan qaar ka mida xubnaha kale, ee goobta, waxaana lagu ridayaa baakado loogu talagalay.

**Qod. 30**
**Saacadaha Codbixinta**

Hawlgallada codbixinta waxa ay bilaabanayaan marka la dhammeystiro arrimaha ku xusan qodobka 24, laakiin aan ka horreynin 6$^{da}$ subaxnimo, kana dambeynin 7 subaxnimo, waxayna kala gó la'áan soconayaan ilaa saacadda markay tahay 7 fiidnimo: codbixintu waa in ay socoto, laakiin aan ka dambeyn 8 fiidnimo, ilaa ay dhammaato codeynta codbixiyayaasha, saacadaha xiridda oo ah 7da, xaadirka ku ah goobta codbixinta horteeda.

**Qod. 31**
**(Ku-dhawaaqidda góaannada goobta codbixinta**

Xubnaha guddiga goobta codbixinta, ayaga oo qaadaya cod aqlabiyad ah, waxay sí KM iyo marmar ah ugu dhawaaqayaan góaanka nattijada, ayaga oo ku qoraya maxadarka wixii cabashooyin xataa af ah iyo shilalka la xiriira hawlgallada isla goobta.

**Qod. 32**
**Hawlgallada Dhammaadka ee Goobta Codbixinta**

Marka ay dhammaadaan hawlgallada ku xusan qodobka kan ka horreyey, guddoomiyaha goobta codbixinta waa in uu qabtaa, sí an kala gó lahayn, hawlqabadya soo socda:

1) waxa uu ku dhawaaqayaa in ay xiran tahay codbixinta aftida;
2) waxa uu xirayaa, uuna lingaxayaa dhammaan sanduuqyada codbixinta: lingaxa dushiisa waxaa la saarayaa shaabadda goobta codbixinta, saxiixyada guddoomiyaha iyo xubnaha kale iyo weliba wakiillada xisbiyada, haddii ay weydiistaan;
3) waxa uu hubinayaa, maxdarkana ku qorayaa tiradeawarqadaha codbixinta ee laga jaray rasiidadooda sí gacanta loogu geliyo codbixiyeyaasha;
4) waxaa uu hubinayaa, maxdarkana ku qorayaa tirada waraaqaha codbixinta ee laga soo celiyey codbixiyeyaasha, sababta oo ah:
   - in ay xumaadeen ama aysan dhammeyn
   - in codbixiyeyaashaas ay cudurdaar laáan ku raageen codbixinta iyo qoqobka gudahiisa
   - in codbixiyeyaashaas lagu helay ayaga oo haysta waraaqo codbixin oo aan ku nooc ahayn kuwa la oggol yahay
   - in ay caddaatay in codbixiyeyaashaas ay ahaayeen kuwo horey u codeeyey;
5) waxa uu hubinayaa, maxdarkana ku qorayaa tirada waraaqaha codbixinta oo aan laga jarin xirmooyinka rasiidada (waraaqaha aan la isticmaalin);
6) waxa uu hubinaya, maxdarkana ku qorayaa , asaga oo ku saleynayo natiijooyinka kor lagu xusay, tirada dadka run ahaan codka bixiyey (codeeyey);
7) waxa uu xirayaa maxdarrada hawlgallada goobta codbixinta;
8) waxa uu waraaqaha daabacan, ee kor ku xusan, ku ridayaa baakadaha loogu kala talagay, inta uu xiro ayuu lingax u saarayaa siyaabaha lagu tilmamay lambarka 2 ee qodobka kan ka horreeyey;
9) Waxa uu shaabadda goobta codbixinta ku ridayaa baakad loogu talagay: lingaxa dushiisa waxa uu saarayaa saxiixyada ku xusan lambarka 2;
10) Waxaa uu baakada ku ridayaa saxaaradaha, ee uu xiray lingaxna saarayo: lingaxa dushiisa waxaa la saarayaa saxiixyada ku xusan lambar 2;
11) Waxa uu saxaaradda xoog ugu xirayaa sanduuqyada codbixinta.

**Qod. 33**
**Lagama Huraannima in Dhammaan Xubnaha Guddiga Goobta Codbixinta ay mar kasta Xaadir yihiin**

Inta ay socdaan hawlgallada goobta codbixinta, dhammaan xubnaha guddiga goobta codbixinta waa in ay mar kasta wada goobjood yihiin, waxaa la oggol yahay maqnaansho waqti yar, waqtigaas oo inta lagu gudajiro waxaa goobta ka tegi kara kaliya hal qof oo haysta fasaxa Guddoomiyaha.

**Qod. 34**
**Maxdarka Goobta Codbixinta**

Maxdarka goobta codbixinta, oo ay saxiixeen dhammaan xubnaha guddiga, waa in lagu soo saaro saddex nuqul (munadood).

Hal nuqul oo ay wehliyaan dhammaan lifaaqyada ku taxan (ku liisgareysan) isla nuqulkaas, waxa uu ku socdaa Xafiiska degmo ee aftida, sí uu uga guto waajibaadka kaga aaddan oo ikhtisaaskiisa, labada kale waxa ay ku socdaan Guddoomiyaha degmada.

**Qod. 35**
**Daabulaadda iyo Wareejinta Agabka Goobta Codbixinta**

Guddoomiyaha, oo uu la socdo ugu yaraan hal xubin oo ka tirsan goobta codbixinta isla markaana ay ilaalinayaan ciidanka nabadgelyada, waxa uu ku dhaqaaqaya, asaga oo aan la daahin, daabulaadda maxdarrada iyo baakooyinka ku lifaaqan iyo ku wareejintooda Xafiiska degmada, ee aftida.

Marka uu baakooyinka ku wareejinayo Xafiiska Degmada, ee aftida waa in uu hubiyaa dhammida lingaxyada dul-saaran saxaaradaha ku xusan qodobka 32, oo ay ku jiraan cabashooyinka qoraalka ah ee soo gaaray iyo sanduuqyada codbixinta.

Marka saxaadaha iyo sanduuqyada codbixinta lagu wareejinayo Xafiiska degmada, ee aftida, waa in la hubiyaa dhammida lingaxyada ayagaas la dul saaray: tallaabadaas waxa laga qorayaa doodqoraal laba nuqul ah, ayada oo mid uu la harayo Guddoomiyaha goobta codbixinta, kan kalana Xafiiska degmada, ee aftida.

Guddoomiyaha goobta codbixinta waxa uu isla markaas amrayaa in guddoomiyaha degmada lagu wareejiyo labada nuqul ee kale ee maxdarka goobta, ee ku xusan qodobka 34.

**CINWAANKA 6AAD**
Hawlgallada Xafiiska Degmada ee Aftida

**Qod. 36**
**Dhismaha Xafiiska Degmada ee Aftida**

Marka uu helo agabka ku xusan qodobka 23, Guddoomiyaha Xafiiska Degmada ee aftida:

1) Waxa uu ku dhaqaaqayaa dhisidda Xafiiska, asaga oo ugu yeeraya in ay qayb ka noqdaan Hubiyayaasha, Xoghayaha, iyo u-qaybsanayaasha tirinta;
2) Waxa uu ugu yeerayaa wakiillada xisbiyada ee musharraxiinta u soo cayintay goobta codbixinta, in ay goobjoog u noqdaan hawlgallada codbixinta;
3) Ka dib maka uu hubsado uuna hubaal-tusiyo dhammida lingaxyada la saaray, waxa uu furayaa saxaaradda (khaanadda), waxa uu ka soo saarayaa agabka ku jira waana uu hubinayaa;
4) Ka dib marka uu hubsado isla markaasna hubaal-tusiyo dhammida lingaxyada la saaray, waxa uu furayaa baakada ay ku jirto shaabadda Xafiiska goobta codbixinta, wuxuuna lambarkeeda ku dul qorayaa maxdarka;
5) Waxa uu agabka haray u gudbinayaa xoghayaha.

Sidaas darteed, Xafiiska Degmada, ee aftida, waxa uu sugayaa (dhowrayaa) helitaanka agabka ku xusan qodobka 35.

**Qod. 37**
**Helitaanka Agabka Goobaha Codbixinta**

Markuu helo saxaaradaha iyo sanduuqyada codbixinta, Xafiiska degmada, ee aftida, waxa uu u hawgelayaa siyaabaha uu tilmaamayo qodobka 35 – faqradda labaad – hadba sida ay u kala hor yimaadeen agabyadu.

**Qod. 38**
**Xiritaanka Xafiiska Degmada, ee Aftida Helitaanka Agabka Goobaha Codbixinta ka dib**

Xafiiska degmada, ee aftida, lama xiri karo ka hor inta uusan soo gaarin, sí caadi ahna aan loola wareegin agabka dhammaan goobaha codbixinta ee degaanka codbixin, ee degmo.
Inta lagu gudajiro waqtiga uu xafiiska xiran yahay, cidina kuma joogi (hakan) karto xafiiskaas dhexdiisa, ilaalintiisa Guddoomiyaha ayaa ku aaminaya askar boliis ah oo istaagaaya bannaankiisa.

**Qod. 39**
**Bilowga Hawlgallada Tirinta Codadkai**

Hawlgallada tirinta waxa ay bilaabanayaan, sí kasta oo ay tahay, saacadda markay tahay 8 subaxnimo maalinta xigta maalinta codbixita, dabadeed markii dib loo dumo xafiiska degmada, ee aftida.

Lama bilaabi karo tirinta codadka goobta, ka hor inta aan la dhammeynin hawlgallada socda, ee la xiriira goobaha codbixinta, ee kale.

Ka hor inta aan la bilaabin tirinta codadka laga dhiibtay goob codbixin oo cayiman, guddoomiyuhu waxa uu furayaa saxaaradda ay ku saabsantahay, ka dib markuu hubiyo dhammida lingaxeeda, wuxuuna kontroolayaa dhammida (bedqabka) lingaxyada dul saaran baakadaha ku dhexjira iyo sanduuqyada codbixinta.

Haddaba, markuu cod dheer ku sheego lambarka goobta codbixinta iyo xarunteeda, guddoomiyuhu, kaddib markuu furo baakadda uu ku jiro maxdarka la xiriira, waxa uu mar kasta cod dheer ku sheegayaa tirada dadka run ahaan codeeyey oo ku qoran maxdarkaas.

**Qod. 40**
**Kala-soocidda iyo Tirinta Waraaqaha Codbixinta**

Marka ay dhammaadaan hawlgallada ku xusan qodobka la hore ee la soo dhaafay, Guddoomiyaha, ka dib marka uu fujiyo lingaxa, waxa uu furayaa sanduuqyada codbixinta, ee cadcad, oo ay ku jiraan waraaqaha lagu bixiyey codadka taageerada dastuurka wuxuna u dhaqaaqayaa kala soociddooda iyo tirintooda, asaga oo kaashanaya mid ka mida kaaliyeyaasha.
Isla ujeeddadaas darteed, waraaqaha ku jira sanduuqyada cadcad ayaa midba mar loo soo saarayaa, ayaga oo la hubiyey, la tiriyey oo gooni, iyada oo mar mar cod dheer lagu sheegayo loo dhigayo tirada wadar ahaaneed oo gaareen codadka lagu taageeray dastuurka.

Marka ay dhammaato kalasocidda iyo tirinta, waraaqaha codbixinta ee xambaarsan codadka lagu taageeray dastuurka waxaa lagu ridayaa isla sanduuqyadii laga soo bixiyey, kawaas oo mar kale la lingaxayo, halka kuwa wax-kama-jiraanka ah lagu ridayo baakad loogu talagay: tirada codadka waxaa kis-kis jadwalka tirinta ugu qoraya xoghayaha.
Sidaas darteed, kaddib marka uu ka qaado lingaxa saaran, Guddoomiyuhu waxa uu furayaa sanduuqda midibka madow, oo ay ku jiraan waraaqahad codbixinta, ee xambaarsan codadka looga soo horjeedo dastuurka, ayada oo la raacaayo habka lagu caddeeyey faqradda la soo gudbay.

Waraaqaha codbixinta waxaa taaban kara xubnaha goobta oo kaliya: wakiillada xisbiyada waa weydiisan karaan in waraaqahaas, mar mar, la soo bandhigo, inta ay socoto tirinta.

## Qod. 41
## Waraaqaha Codbixinta ee wax kama Jiraanka

Waa wax kama jiraan waraaqaha codbixinta oo aan lahayn shaabadda goobta, iyo kuwa ay saaran yihiin saxiixyo, magacyo iyo calaamooyin oo qoraal ah, ee sameeyey codbixiyaha.

## Qod. 42
## Lagama Maarmaannimada Joogitaanka Dhammaan Xubnaha Goobta Codbixinta

Inta ay socdaan dhammaan hawlgallada kala-soocidda iyo tirinta, xubnaha
Xafiiska degmada, ee aftida, waa in ay mar kasta yihiin kuwa jooga. Waxaa kaliya oo la oggol yahay maqnaansho gaaban, ayada oo inta lagu gudajiro maqnaanshahaas, aysan goobta ka fogaan karin wax ka badan mid ayagaas ka mid ah oo hayta fasaxa guddoomiyaha.

## Qod. 43
## Baarista Cabashooyinka iyo Goáannada la Xiriira

Marka la dhmmeeyo hawlahada tirinta codadka, Xafiiska degmada, ee aftida, waxa uu baarayaa cabashooyinka loogu soo gudbiyey saxaaradda goobta codadkeeda la tiriyey, iyo weliba kuwa markaas ka dib qoraal loogu soo gudbiyo Xafiiska horey loo soo sheegay xagga wixii la xiriira hawlgallada isla goobtaas codbixin, wuxuuna cabashooyinkaas goáan kaga gaarayaa cod aqlabiyad ah.

## Qod. 44
## Hubinta Natiijooyinka Goob kasta

Marka la dhammeeyo hawlgallada ku xusan qodobbada la soo dhaafay, guddoomiyaha, haddii loo eego isla goobtaas codbixin:

1) waxa uu hubinayaa kala-duwanaanta u dheceysa xogaha uu soo uruuriyey xafiiska degmada, ee aftida, marka lagu eego, kuwa lagu qoray maxdarka goobta codbixinta, ayada oo la sheegayo, haddii ay jiraan, sababaha la xiriira;
2) waxa uu cod dheer ku sheegayaa tirada guud, ee codbixiyeyaasha, waraaqaha codbixinta ee ansaxa ah, iyo waraaqaha codbixinta, ee wax kama jiraanka;
3) waxa uu sheegayaa, asaga oo sí cad u tilmaamayo, kuna sheegay cod dheer, tirada codadka taageeraya dastuurka iyo tan codadka ka soo horjeeda;

4) waxyaabaha kor lagu soo sheegay waxa uu ku qorayaa maxdarka Xafiiska degmada, ee aftida.

**Qod. 45**
**Xaaladda Durkinta Waqtiga ay Soconayaan Hawlgallada Tirinta Codadka**

Hawlgallada tirinta codadka, ee ku aaddan goob codbixin oo cayiman, haddii ay bilaawdaan, waa in loo dhammeystiro sí aan kala-gó lahayn.

Haddii ay dhacdo in hawlgallada xafiiska aan lagu dhammeyn karin isla maalintaas, guddoomiyuhu waxa uu dib u dhigaa ilaa 8 subaxnimo, ee maalinta xigta.

**Qod. 46**
**Xisaabinta Natiijooyinka Guud, ee Aftida Gudaha degaan Codbixinta Degmo**

Marka goob kasta oo codbixin, ee degmo, laga dhammeeyo hawlgallada ay jideeyeen qodobbada hore, ee la soo dhaafay, guddoomiyuhu:

1) Waxa uu xisaabayaa, xagga dhammaan goobaha degaan-codbixin, tirada codbixiyeyaasha, waraaqaha codbixinta, ee ansaxa ah, waraaqaha wax kama jiraanka ah, codadka lagu taageeray dastuurka iyo codadka ka soo horjeeda;
2) Waxa uu cod dheer ugu dhawaaqayaa natiijooyinka KMG (ku-meel gaarka ah), ee aftida, ee ka dhacay degaan-codbixinta heer degmo, asaga oo sí gooni ah cod dheer ugu dhawaaqaya, tirada codadka lagu taageeray dastuurka iyo kuwa ka soo hor-jeeda;
3) Waxa uu natiijooyinkaas taar ahaan ku gaarsiinayaa Xafiiska dhexe, ee aftida;
4) Waxa uu saddex nuqul ka soo saarayaa maxdarka hawlgallada uu sameeyey Xafiiska degmo, ee aftida iyo natiijooyinka la xiriira, oo ay saxiixayaan dhammaan xubnaha: nuqul ka mid ah nuqullada maxdarka waxaa lagu wareejinayaa guddoomiyaha degmada, nuqullada kale, mid waxaa loo dirayaa Maxkamadda Sare, midka kalana Xafiiska dhexe ee aftida: ayaga oo lagu xirayo maxdarka waa in loo diraa Xafiiska dhexe ee aftida, dhammaan cabashooyinka uu haayo xafiiska degmada, ee aftida, oo ku jira baakad lingaxan oo loogu talagalay, kaddib marka lagu dul xasuus-qoro goobaha laga tixraacayo;
5) Waxa uu amrayaa in agabka soo haray, ee goobaha codbixinta iyo Xafiiska degmada, ee aftida, lagu babeeyo meel loogu talagalay ee uu tilmaamay Guddoomiyaha degmada, qalabkaas oo xiran, lingaxna saran yahay, sí halkaas loogu haayo, loona haayo Maxkamadda Sare ilaa la ansixiyo aftida.

**CINWAANKA 7AAD**
Hawlgallada Xafiiska Dhexe ee Aftida

**Qod. 47**
**Dhismaha Xafiiska Dhexe ee Aftida**

Guddoomiyaha Xafiisku, markuu Wasaaradda Arrimaha Gudaha ka helo agabka ku xusan qodobka 18:

1) waxa uu ku dhaqaaqayaa dhismaha Xafiiska, asaga oo ugu yeerayo ku-xigeenka guddoomiyaha, kaaliyeyaasha, hubiyayaasha, xoghayaha iyo u-qaybsanayaasha tirinta in ay qayb ka noqdaan;

2) waxa uu ku casumayaa wakiillada xisbiyada in ay goobjoog ka noqdaan hawlgallada murashxiinta u soo cayintay goobta ku casumayaa in ay goobjoog ka noqdaan hawlgallada;
3) Kaddib markuu arkoo, isla mar ahaantaasna uu xubnaha kale ee Xafiiska, iyo wakiillada xisbiyada tusiyo dhammida lingaxyada la saaray, waxa uu furayaa saxaaradda waxa uuna kontroolayaa agabka ku jira halkaas;
4) kaddib markuu arko isla markaana tusinaya dhammida lingaxyada la saaray,
waxa uu furayaa baakada ay ku jirto shaabadda xafiiska, wuxuuna lambarkeed ku qorayaa maxdarka;
5) waxa uu agabka soo haray u gudbinayaa xoghayaha.

### Qod. 48
### Waajibaadka Xafiiska Dhexe ee Aftida

Xafiiska dhexe, ee aftida:
1) isla marka uu helo akhbaarta taarar ahaaned ee ku xusan lamba. 3 ee qodobka 46, waxa uu xisaabayaa kuna dhawaaqayaa natiijooyinka guud oo kumeelgaarka ah,ee aftida;
2) isla markii uu helo dhammaan maxdarrada iyo cabashooyinka ku xusan lr.4, ee qodobka 46:
   — waxa uu sí kmg goáan uga gaarayaa isla cabashooyinka soo gaaray iyo kuwa markaas kaddib la keeno Xafiiska dhexe, ee aftida;
   — waxa uu guud ahaa xisaabayaa xagga dhammaan goobaha codbixinta, ee dhulka Jamhuuriyadda, tirada dad codeeyey, warqadaha codbixinta, oo ansaxa ah, iyo warqadaha codbixinta, oo wax kama jiraanka ah, codadka taageeray dastuurka iyo codadka lagaga soo horjeestay.

Sidaas darteed, guddoomiyuhu waxa uu, sí cod dheer ah, ugu dhawaaqayaa natiijooyinka ku-meel gaarka ah, ee aftida, dhammaan dhulka Jamhuuriyadda gudahiisa.

## CINWAANKA 8AAD
Qodobbada Ciqaabta

### Qod. 49
### Ku Xadgudubka Xaqa Dicaayadda

Qof kasta, tab kasta ha adeegsado, horjoogsada ama carqaladeeya kulan dicaayad, mid guud iyo mid gaara kow doono ha ahaadee, ama horjoogsada dhejinta waraaqaha xambaarsan farriimada madaxda dawladda, ee ku saabsan hawlgallada aftida, ama horjoogsada faafinta ama dhejinta warqada daabacan, ee dicaayadda, amaba baabiíya warqadaha baraarujinta codbixiyeyaasha ama warqadaha daabacan, dhegsan ama loogu talagalay dhejinta iyo faafinta, waxaa lagu ciqaabayaa xarig gaaraya ilaa labo sano ama ganaax gaaraya ilaa Sh. So. 2.400.

Isla ciqaabtaas waxaa muteysanaya qofka isticmaala tabab iyo habab uusan sharcigu oggolayn.

## Qod. 50
## Ku Xagudubka Xurriyadda Codka

Qof kasta, asaga bixinaya, ballan-qaadaya, siinaya lacag ama nacfi kale ee shakhsi, ama asaga oo ballanqaadaya, siinaya ama siiya ama gacan ku siiya in uu helo shaqo dawladeed ama gaar, ku-xadgudba xurriyada codka, waxaa lagu ciqaabayaa ilaa hal sano oo xarig ah ama ganaax ah ilaa Sh.So. 1.200.

Qof kasta, oo ujeeddooyinka kor ku xusan dartood, isticmaala xoog ama haddadaad, fal iyo khiyaano (dhagar), waxaa lagu ciqaabayaa xarig gaari kara ilaa laba sano iyo weliba ganaax gaari kara ilaa Sh.So. 2.400.

## Qod. 51
## Ku Xagudubka Habsami u-socoka Hawlgallada Codbixinta iyo Tirinta Codadka

Qof kasta, asaga oo adeegsanaya xoog iyo haddadaad (cagajugleyn), is-hortaaga in sí xor ah loo dhiibto codka ama carqaladeeya habsami u-socodka hawlgallada ka socda goobta codbixinta ama tirinta codadka ee ka socda Xafiisyada degmada, ee aftida, waxaa lagu ciqaabayaa xarig gaari kara ilaa laba sano iyo weliba ganaax gaari kara ilaa Sh.So. 2.400.

## Qod. 52
## Gelitaanka aan la Oggolayn ee Goobaha Codbixinta iyo Xafiisyada Aftida

Qof kasta, oo asaga oo aan xaq u lahayn, inta ay socdaan hawlgallada aftida, gala goobta codbixinta ama Xafiisyada aftida ama ku dhex negaada in kasta oo loogu baaqay in uu ka baxo, waxaa lagu ciqaabayaa xarig gaari kara ilaa hal bil ama ganaax gaari kara ilaa Sh.So.100.
Haddii qofka uu hubeysan yahay, waxaa lagu ciqaabayaa xarig gaaraya ilaa hal sano ama ganaax gaaraya ilaa Sh. So.1.200.

## Qod. 53
## Codbixinno Xadgudub ah

Qofka, asaga oo og in uusan xaq u lahayn in uu codeeyo, ama asaga oo sheegta magac qof kale, u xaadiro in uu codbixiyo, ama ay caddahay inuu bixiya hal cod ka badan ama ayada oo loo xilsaaray in uu codka u bixiyo qof aan asaga shakhsiyan codeyn karin, codka u bixiya sí ka duwan sidii loo tilmaamay, waxaa lagu ciqaabayaa xarig gaari kara ilaa lix bilood ama ganaax gaari kara ilaa 600.

Isla ciqaabtaas waxaa muteysanaya qof kasta oo gacan ka geysta in codeynta loo oggolaado qof aan xaq u lahayn ama laga reebo qof xaq u leh ama uu guddiga goobta uga been-sheega magaca iyo tilmaan qof kale, amaba haysta warqad codbixin (kaar) sí uu u codeeyo xaalado iyo habab ka duwan kuwa sharcigu oggol yahay.

Ciqaabtu waa xarig gaaraya ilaa laba sano iyo weliba ganaax gaaraya ilaa Sh. So. 2.400, haddii dembiyada ku xusan faqradda hore ee la soo dhaafay ay yihiin kuwo ay galeen saraakiil dawladeed ama loo-xilsaare.

**Qod. 54**
**Been-abuurid ama xadid Dokumeeti iyo wax-ka-beddelid xog la Xiriirto Aftida**

Qof kasta oo sí been-abuur ah u sameeya warqado (kaarar) codbixin iyo qoraallo kale, ee uu sharciga u qoondeeyey hawlgallda aftida, amaba wax ka beddela, xada, kuwa kale ku beddela ama burburiya gebi ahaan ama qayb ka mid ah qoraalladaas runta ah, amaba asaga oo og isticmaala qoraallada been-abuurka ah ama wax laga beddelay ama la isku beddelay, xataa qofkaas uusan qayb ka qaadan fulinta arrinta, waxaa lagu ciqaabayaa xarig gaaraya ilaa laba sano iyo weliba ganaax gaaraya ilaa Sh.So. 2.400.

Isla ciqaabtaas waxaa lagu ciqaabyaa nin kasta oo hab kasta ku beddela natiijada aftida.

**Qod. 55**
**Falal iyo ka-baaqsiyo Khilaafsan Sharciga oo ay ku kaceen Xubnaha Goobta Codbixinta iyo Xafiiska Aftida**

Qof kasta, oo ka tirsan goob codbixin ama xafiis ka mid ah xafiisyada aftida, oo uu gelo (ku dhaco) mid ka mida dembiyada ku xusan qodobbada la soo gudbay, ee cinwaankan, waxaa lagu ciqaabayaa ciqaabta loo dejiyey dembigaas oo saddex meeloodoo meel, haddii uu sameeyo fal-dembiyeedyo ama ka-reebtoomiyo, ee uusan sharcigu jideynin, kuwaas oo wax aan suurtogal ahayn ka dhigaaya hawlgallada aftida ama hor-istaagaya caadi u-fulinta ama wax u-dhimi kara ansaxnimada, waxaa lagu ciqaabayaa xarig gaaraya ilaa saddex sano iyo weliba ganaax gaaraya ilaa Sh.So. 3.000.

**Qod. 56**
**Diiddo Cudur-daar laáan ah ee Qayb ka-noqosho Goob Codbixin ama Xafiis**

Dadka, oo ayada oo loo magacaabay xil xubinnimo goob codbixin ama Xafiis ka mida xafiisyada aftida, oo cudur-daar laáan, diida ama aan goobjoog ahayn marka lala wareegayo Xafiiska ama goobta codbixin, waxaa lagu ciqaabayaa ganaax gaaraya ilaa 600.

Isla ciqaabtaas waxaa muteysanaya xubnaha kor lagu soo sheegay, ee cudur-daar laáan, goobta isaga taga ama ka fogaada ka hor inta aysan dhammaan hawlgalla la xiriira.

**Qod. 57**
**Luminta Xaqa Doorashada iyo Garmagalka Tooska**

Xukunnada ciqaabta ee la xiriira dembiyada ku xusan Sharcigan, haddii garsooruhu dabbaqo ciqaab xarig ah, ee aan ka yareyn laba bilood, waxa ay muwaadinka ka qaadayaan xaqa wax doorashada, muddo 5 sano.

Dacwadaha dembiyadaas waxay maxkamadda ku qaadeysaa habka garmagalka tooska ah.

**CINWAANKA 9AAD**

Qodobbada Dhammaadka iyo kala-guurka

**Qod. 58**
**Kormeerka Guddoomiyaha Gobolka**

Guddoomiyaha gobolka waxa uu kontroolayaa, ee uu sí toos ahna u xaqiijinayaa haddii loo baahdo, in hawlqabadyada uu Sharcigan ka dalbaayo madaxda goobaha codbixinta, ee hoos imanaya, ay ku dhammaadaan waqtigii loo gooyey iyo hab-raacyada loo dejiyey.

**Qod. 59**
**Xaaladaha Matalaadda Guddoomiyaha Degmada**

Guddoomiyeyaasha degmooyinka, xagga hawlqabadyada uu Sharcigan ku waajibinaayo, ee laga fulinaayo meelo ka fog magaalamadaxda degmada, waxa ay u wakiilan karaan maamulayaasha idman, ee ku xusan faqradda ugu dambeysa, ee qodobka 18, hawlwadeenno kale, ee Maamulka Dawladda, iyo madaxda Maamullada dawladaha hoose.

Marka laga hadlaayo ergooyinka, matalaaddaas waxaa leh maamulaha idman ee degmada.

**Qod. 60**
**Dhaqangalka Sharciga**

Sharcigani waxa uu dhaqangelayaa maalinta lagu shaaciyo Faafinta Rasmiga.
Sharcigan waxaa la gelinayaa Ururinta Rasmiga ee Sharciyada iyo Xeerarka, waxaana lagu shaacinayaa Faafinta Rasmiga.

Cid kasta oo ay la gudboon tahay waa ku waajib in uu u dhowro, iyo inuu inta kale ku khasbo in ay u dhowraan sida sharci ay leedahay Jamhuuriyadda.

Madaxweynaha
**Aaden Cabdulle Cusman**

Wasiirka Kowaad
**Cabdirashiid Cali Sharma'arke**

Wasiirka Arrimaha Gudaha
**Cabdirisaaq Xaaji Xuseen**